GO'AANKII DHEX-DHEXAADINTA EE NABADAYNTA ISIMMADA PUNTLAND

Annigoo tixraacayna laba warqadood oo ay kalsooni ahaan noogu dhiibeen Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland Mudane C/llaahi Yuusuf Axmed iyo Guddoomiyaha Golaha Badbaadinta Puntland (GBP), Mudane Gen. Maxamuud Muuse Xirsi (Cade).

Markii aan eegnay dhibaatooyinka maanta lagu jiro iyo khilaafka maamul ee ka dhexeeya Dawlad Goboleedka Puntland, markii aan aragnay in lagama maarmaan ay tahay in la helo midnimada Puntland.

Waxaan maarnta oo bishu tahay 15/06/2003, Go'aamiyeen in Golaha Badbaadinta laga siiyo Maamulka Dawlad Goboleedka Puntland saamiga hoos ku qoran.

A) Golaha Wasiiradda	**3 Xubnood**
Wasiir Ku Xigeen	**2 Xubnood**
Agaasime yaal	**2 Xubnood**
Agaasime Waaxeedyo	**3 Xubnood**

B) Ciidamda

- In la siyo labada Taliye ciidan midkood (Booliiska ama Daraawiishta)
- In la siiyo labada Taliye Saldhig midkood (Dekeda ama Airportka)
- In Saraakiisha GBP lagu kala meeleeyo sadexda ciidan ee D.G.Puntland.
- In la qarameeyo dhamaan Ciidanka GBP marka laga reebo.

a) Qof buka

b) Qof aan haysan qori

c) Qof naafo ah

d) Qof aan ku jirin urur Siyaasi ah

C) Maamuladda Goboladda

Goboladda in la siiyo GBP Gudoomiyayaasha ugu yaraan 2 xubnood.

D) Maamulada Degmooyinka

In la siiyo Gudoomiyeyaasha Degmooyinka ugu yaraan 2 xubnood gaar ahaan Degmooyinka Gobolka Bari.

E) Maamadam Goboladda Dawlad Goboleedka Puntland loo baahan yahay in Gobol walba ka muuqdo Maamul sare ee hogaaminta Puntland, sidaas darteed, waxaan Go'aamiyey in Gobolka Bari la siiyo Xubinta Maxkamada Sare ee D.G.Puntland kaas oo ah Guddoomiyaha Golaha Garsoorka ee Puntland.

F) In la siiyo Tacwiid suurto-gal ah Golaha Badbaadinta Puntand

G) Iyadoo la tixgelinayo rabitaanka dadweynaha ee Puntland, si loo helo hogaan ku dhisan Dimoqraadiyada, xilkuna isu badali karo si sharci ah, waa in ugu horayn ay noqdaan Maamulladdda Degmooyinka kuwo u Madaxbanaan Maamulkooda, kuna yimaada doorashooyinka cadaalad ah.

H) Si loo celiyo loona xajiin tiro walaaltinimadii iyo midnimaddii Puntland, waa in la sameeyo Guddi Turxaanbixineed, lana soo celiyo wadajirka iyo walaaltinimada dadweynaha Puntland.

I) In laga siiyo Golaha Badbaadinta Puntland Ergedda shirka Dib u heshiisiinta ugu yaraan 3 xubnood.

J) Maadaama uu dhamaaday khilaafkii Maamul Goboleedka Puntland, waxaa maanta oo ay bishu tahay 15/05/2003, sidaas darteed, waxaa dhaqan beelay Golaha Badbaadinta ee Puntland, waxayna ka mid noqdeen Maamul Goboleedka Puntland.

K) Dhamaan Masuuliyiinta loo dhiibayo xilalkan ku cad heshiiskan, waxaa loo baahan yahay in ay noqdaan kuwo hanan kara xilkooda, isla markaana aqoon u leh masuuliyadda loo magacaabay.

L) Heshiiskani wuxuu dhaqan galayaa marka ay saxiixaan labada dhinac, oo ah maanta oo bishu thay 17/05/2003.

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Cabdullaahi Yusuf Axmed

Markhaati

Guddoomiyaha Golaha BP

Gen. Maxamuud Muuse Xirsi (Cade)

Markhaati

Boqor Cismaan Aw Maxamuud

Suldaan Siciid Suldaan C/salaan